**Heshiis amaahasho ku saabsan oo ku saabsan Laptp PC/ nettbrett iyo amaahasho agab waxbarasho oo lacag laaan ah oo u dhexeeya gobolka Vestfol iyo Telemark** (org.nr. 821277062)
jyo
Magaca ardayga
Dhalashada ardayga

## 1. Guud ahaan

### 1.1 u dhexaysa

Heshiiskan waxaa wada galay oo uu ka dhexayaa gobolka Vestfold iyo Telemark iyo ardayga oo kiraystay.Marka la kala gooyo gobolka Vestfold iyo Telemark heshiiskan waxaa laga wareejinayaa gobolka Vestfold iyo Telemark,waxaana loo wareejinayaa Gobolka Telemarka arna gobolka Vestfold taas oo ku salaysan hadaba gobolka iskoolkaagu ka tirsan yahay.
Hadii aanu ardaygu qaangaar ahayn ,heshiiska waxaa lala gelayaa waalidka ardayga kaas oo ka masuul aha amaahdaha.
Markaan saxiixo waxaa xaqiijinayaa in aan akhriyey nuxurka dukumintiga oo aana aqbalay, oo ana aqbalay shuruudaha gobolka iyo hab raaca isticmaalka iyo sida ardagu ula dhaqmayo PC/nettbrtett (Waxyaabha loo yaqaan qalabka kumbiyuutarka) iyo agabka waxbarasha ee la-cag la'aan ah.
Heshiiskan waxaa lagu saxiixayaa si dijitaal ah halkan https://elevkontrakter.vtfk.no/

### 1.2. Xuquuqda hantida /xuquuqda isticmaalka

Qalabka/qalabka waxbarshada sida heshiiska ku qoran waa hantida gobolka,ardigu wuxuu leeyahay oo kelya xuquuqda isticmaalida inta uu kumbiyuutarka ka gadanayo oo aad ka yeelanayo.

## 2.Kiraysashada Laptop-ka PC/nettbrett

### 2.1 Qalabka kumbiyuutarka software-ka ee heshiisku daboolay

Nidaamka waxaa ka mid ah oo uu daboolayaa Laptop PC/MACbook wata jaarjer iyo qalab kale oo dheeraad ah,hadii la wax yeeleeyo arna la lumiyo shuruudaha heshiisku wuxuu khu-seeyaa sidoo kale kumbiyuutarka la amaahdo.
Borogaamadan soo socda ayaa lagu rakibayaa kaas oo ay weheiyaan nidaamka hawlgalka:
• Barnaamijka taageerida xafiiska ee **(Office365)**
• Barnaamijka antivirus-ka
• Barnaamijo kale oo iskoolku u isticmaalo waxbarasha

### 2.2. lsticmaalka qalabka

Ardayga waxaa waajib ku ah :
• Waa in la hubiyaa in qalabka laga ilaaliyo waxyeelada iyo in la xado (tusaale ahaan lagu xafido khaanad la xiri karo,marka la soo qaadanayana boorso lagu rido,lana isticmaalo bac roob,boorso gacmeedna lagu qaado marka la safrayo).
• Cid kale ha amaahin kumbiyuutarka, meelna ha uga tegen iyada oon cidi ilaalinayn.
• Ha soo dejinina waxyaaba wax yeelan kara arna borogaamo kale.
• Waxba ha ka bedelin,hana koobiyayn borogaamada hore loogu diyaariyey kumbiyuutarka iyada oo aadan ogolaansho gaar ah aadan ka haysan.
• Ku hubi in aad soo koobi garaysid waxyaabaha la xiriira dhanka bed qabka.

• Ha ka tirtin mashiinka calaamadaha{noocyada calaamadaha ah,nambarka wershedu ku samaysay iyo wixii la mid ah).
• Adigu wax calaamada ha ku samayn mashiinka arna waxyaabaha lagu dhejiyo.
Hadii looga shakiyo kumbiyuutarka vurus arna dhibaato kale waa in ardaygu la xiriiraa IT-ga si loogu hagaajiyo pc.Hadii looga shakiyo arna la arko in si khaldan loo isticmaalay kumbiyuutarka,xafiiska IT-gu wuu kaa qaadi karaa kumiyuutarka si loo koontorolo.Hadii ardaygu keeni waayo waxaa laga xirayaa si aadan u isticmaalin.
Ardayga lama siinayo xuquuqda maamul ee kumbiyuutarka, ilaa iyo inta laga bixinayo lacagtii sadexda sano ee kirada la bixiyo marka iskoolku dhamadan aad adigu yeelato.
lsticmaalka waxaa nidaamiya hab-nidaameedka dugsiyada sare ee gobolka

**2.3. Adeega iyo garantiiga**
Ardayga waxaa waajib ku ah in uu kumiyuutarka u geeyo shaqaalaha farsamada kumbiyutarda si loo casriyeeyo,khaladadka looga saxo lana hagaajyo,hadii ardaygu isaga arna cid kale uu u ogolaado in ay hagaajiyaan kumbiyuutarka, saamayntu waxay noqon kartaa in uu garantiga la lumiyo.Taasi waxay keeni kartaa in ardaygu dhiibo mag-dhaw,hadii loo baahdo iskoolku wuxuu ardayga siin karaa qalabka lagama maar-maanka ah.Ardaygu waan uu soo sheegaa garantiga ugu danbayn 20ka juun sanad dugsiyeedka sadexaad, kadib marka heshiiska la galo.Tani waxay kaloo khusaysaa waxyeelada soo gaartay kumibiyuutarka la amaahday.

**2.4. Waxyeelayn**
Dhamaan ciladaha qalabka iyo sidoo kale waxyeelada arna lumida waa in lagu war geliyaa iskoolka sida ugu dhakhsiiyaha badan ee ugu horaysa ugu danbayn 14 maalmood gudohood.
Ardaygu waa in aan isku deyin in uu isagu hagaajiyo waxyeelada,laakiin uu u daayaa iskoolka.hagaajinta aay samayaan adeegyaal aan la ogolayn, waxay keeni kartaa in aan khasaarahaas la daboolin/labixn.
Kasaaraha arna dayaa waxyeelada ay keento dayacaad ka ti ardayga,waxaa bixinaya khasaardaas ardayga.
Tusaale ahaan dayacaaddu waxay noqon kartaa:
• Cabitaan arna dareere kale hadii lagu daadiyo mashiinka
• Hadii lagu kaydiyo boorashada arna kiinska kumbiyuutarka cabitaano arna dareerayaal.
• Hadii loo qaado qaab aan munaasib ahayn
• Hadii waxyeelo soo gaarto marka aad gaadiid saran tahay
• Hadii la dhigo/saaro meel aan haboonayn tusaale ahaan meel saraysa,.dhulka arna meel koona ah iwm.
• In aad ku isticmaashid meel aan haboonayn (tusaale ahaan meel ciid ah,dhooqo h biyo leh,qalbaka alxanka arna waxyaaba kale oo mashiinka waxyeelayn kara warshad iyo wixii lamid ah).
• Aad dhigto meel aadan adiga arna ardayda kale ilaalinayn.
• Hadii waxyeelo ka soo gaarto hadada shay saarto kiiboorka iyo shaashada dhexdooda kadibana aad xirto.
• Hadii waxyeelo ka soo gaarto meel aan haboonayn oo aad dhigtay darted kumbiyuutarka ooaad adiga arna qof kale ku fariisto.
Waxaad dhiibi qayb lacageed waxyeelada aad u geysato.Qaybta aad dhiibaysaa waxay ku xirnaanaysaa waxyeelada aad geysatay inta ay le'eg tahay hadba.

Haii waxyeelada loo arko taxdar la'aan ardagu waa in uu bixiyaa kharashaka oo dhan.Waxy-eelada ku timaada taxad la'aan waa in ardaygu bixiyo kharashka lagu hagaajiyey.hadii lagu samayo dayacaad kumbiyuutarka ardaygu waa in uu bixiyaa qiimaha hadhaaga ah ee kumbiyuutarka si waafaqsan habraaca gobolka.

## 2.5. Xadista

Hadii ay dhacdo in la xado ardaygu waa in uu si degdeg ah ugu war geliyaa boolska.is-koolkuna waa in loo keenaa nuqul kam mid ah warbixinta xatooyada.Hadii kumbiyuutarka laga xado sanduuqa ardayga oo xiran arna qolka iskoolka oo aan booliska lagu war gelin,ar-dayga waxaa laga rabaa lacagta oo dhan sababtoo ah waxaa loo arkaa dayacaad.
Xatooyada laga xado meelaha gaarka ah arna meelaha dadweynaha oo u uku jiroiskoolku waa in uu ardayga/waalidka bixiyaan caymiska.

## 2.6. Xaq u yeelashada in aad yeelato qalabaka

### Ku saabsan guud ahaan la wareegida

Si uu ardaygu ula wareego kumbiyuutarka,waa in uu bixiyey kiradii sadexda sano oo uuna dhameeyey iskoolka.Ka dib waxaa loo furayaa kumbiyuutarka,si ardaygu isagu sida uu rabo u maamusho,shatiga MS Windows wuu heli karaa markaas,mase heli karo shatiga  xafiiska (office) dhamaan borograamada kale oo dhan waa la tir-tirayaa.

### Ardayda wadamadu is dhaafsadaan

Ardaygu wuu qaadan karaa kumbiyuutarka,hadii ardaygu uu debeda iskool u ado.
Maqnaansha ka badan lix bilood waa in loogu hagaajiyaa in loo isticicmaalo si khaas ah(privat), ardayguna waa in uu bixiyaa inta ka harsan kiradii, ardaygu markaa isgaa maamulanaya kumbiyuutaqrka, kuna samaysan kara barograamka uu u baahan yahay,marka ardaygu dib ugu soo noqdo iskoolka,marka uu soo dhamaysto waxbarashadii dibeda,waa in ardaygu la soo xiriira iskoolka qaybta kumbiyuutarada si loogu diyaariyo oo uu u isticmaalo.

### Bedelashada iskoolka

Hadii ardaygu ukala bedesho iskoolada dawliga ah ee gobolka wuxuu ardaygu kumbiyuutarka u qaadanayaa iskoolka cusub.

Hadii ardaygu u bedesho iskool gaar loo leeyahay ama mid dawli ah oo gobol kale ah,waa in heshiiskii kirada ee gobolka la joojiyaa ama la bixiyaaa lacagta kirada ee harsan, iyada oo la raacayo xuquuqda qawaaniinta  ee waxbarashada qodobka 19-6 ama la soo xerayo kumbiyuutarka. Ardagu waa in uu la xiriiraa iskoolka cusub  warbixinaha iyo sharciyada khusaya.

### Joojinta iskoolka

Hadii ardaygu joojiyo inta ka horaysa 1 oktoobar isla dayrta uu heshiiska galay,xaq uma yeelanyo ardaygu in uu kumbiyuutarka qaato,waxaana waajib ku ah in uu dib ugu soo celiyo iskoolka.Hadii ardaygu joojiyo inta ka danbaysa 1 oktoobar wuu haysanyaa kumbiyuutarka, waana in lacagta kirada eek u dhimana uu bixiyaa.Hadii ardaygu joojiyo kadib 1 oktoober kadi boo aanu rabin in uu kumbiyuutarka haysto,wuxuu aradgu bixinyaa lacagta kirada marka sanad dugsiyeedku bilaabmo.

**Waxbarasho sii wadasho,tusaale ahaan dhisida xirfadaha waxbarashada guud**
Ardaygu wuxuu sii isticmaali karaa isla kumbiyuutarkii uu lahaa Vg2 ka dib kaduu sii wadanayo gobolka Vestfold iyo Telemark waxbarashada ama tababarashada.

Hadii aanu ardagu haysan kumbiyuutar markii hore wuxuu iskoolka ka kiraysan karaa kumbiyuutar isga oo kiro sanadle ah bixinya,kumbiyuutarkana wuxuu dib ugu soo celinyaa iskoolka marka uu waxbarsahda dhamayo.Ardagu waa in uu saxaiixaa heshiiska kirada.

## 3.Amaahasho agab waxbarasho oo lacag la'aan ah

Heshiiskani wuxuu khusayaa sanad dugsiyeedka oo dhan arna hal sano dugsiyeed si loo helo agab waxbarasho oo lacag la'aan ah,kaas oo la soo celinayo marka iskoolku dhamaado arna hadii iskoolka dhexda lagu joojiyo.
Sida kamidka ah nidaamka amaahshada waa in ardayga iyo waalidku saxiixaan heshiis-kan,kaas oo ay shuruudahaha amaahashada iyo iyo isticmaalka iskoolku lu cadyihiin.

Dhamaan amaahashada waxaa lagu diiwan gelinyaa nidaakna amaahashada ee laybareeriga.

OGAYSIIN-Hadaad iskolka dhamayso.arna rnaado dhamayso.maado joojiso arna sanad dug-siyeedka joojiso waa in agabka waxbarashada dib loogu soo celiyaa iskoolka.agabka waxba-rasho ee aan la soo celin waxaa loo arkayaa in aad gadateen waxaana boonada aad lacagta ku bixinaysaan loo soo dirayaa ardayga/waalidka. Qiimaha iibka dhabta ah baa laguu soo diri.

**Isticmaalka qalabka:**
Dharnaan agabka waxbarshada ee ardaygu arnaahdo waa hantida iskoolka.Hadii ardaygu ka tagoiskoolka inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka,waa in dharnaan agabka waxbarashada isla rnarkiiba la soo celiyaa.
Waajibaadka ardayga:
- Aad si rnasuuliyad leh ula dhaqanto agabka waxbarashada si aanay u soo gaarin daal iyo jeexdin aan loo baahnayn.
- Ha isticrnaalin calaarnad.hoosta ka xariiqid qoraalka.ama aadan wax ku qorin buugaagata aad arnaahay.
- Aad ka ilaalisid in calaarnada arna koodaha iyo bogaggu aan biyo gaarin. la wasakhayn aana daal aan kan caadiga ahayn loo geysan

Hadii la lumiyo ama la waxyeelayo qalabka waxbarshahsda qofka ku saxeexan baa si buuxda masuul uga ah mag-dhawga,mag-dowga lagaa dhaafi mayo hadii xitaa aad soo celiso ka dib wakhtiga kama danbaysta ah qalbka waxbarashada

## 4.Lacag bixinta iyo saxiixa

Kumbiyuutarka,ardaygu waa in uu bixiyaa kirada sanadlaha ah ilaa sadex sano. Ardaygu wuxuu ku bixinayaa si horumarin ah hal mar sanad dugsiyeedka isaga oo ku bixinaya qaab elektaroonik ah gobolka.Kiradu waxay u dhigantaa inta ugu yar ee kaalmada waxbarashada ee khasnada dawlada (lånekassen) sanadkiiba mar baa la kordhiyaa.

Hadii ay dhacdo qaansheegad la xiriira in ardaygu soo celiyo agabkii waxbarasho ee lacag la'aanta ahaa arna dayacaad si waafaqsan heshiiska, adaygu wuxuu loo soo dirayaa qaan sheegad,hadii ardagu bixin waayo lacagta qaansheegadka ah,waxaa loo soo dirayaa qoraal xusuusin ah in loo dirayo Inkasso,gobolku lacagta uu dalbyo wuxuu ku wareejin karaa hayada kale.

Ardayga da'diisu ka yar tahay 18 sano,wixii la xiriira lacag bixin la'aan waxaa masuul ka ah waalidka/masuulka saxiixay,hadii ay dhacdo lacag aan la bixin.

**Heshiiska ku saabsan laptop-ka /kumbiyuutarka aad kiraysatay iyo qalabka waxbarashada aad amaahatay**

Waxaan cadaynayaa in aan akhriyey waxaa ku qoran dukumentigan, saxiixaygu wuxuu cadaynayaa in aa aqbalay shuruudaha gobolka iyo hab raaca isticmaalka iyo sida ardaygu ula dhaqmayo kumbiyuutarka iyo shuruudaha iyo tilmaamaha isticmaalida iyo maaraynta agabka waxbarasho ee lacag la'aanta ah ee uu amaahday.

Heshiiska waxaa loo diyaariyey si waafaqsan sharciga waxbarashda § 3-1 (9)

Cf. xeerka sharciga waxbarashada §19-6.

3-1 (9) cf. xeerarka sharciga waxbarashada § 19